

COVID-19 | Maatregelen | 20/08/2020

SOMALI | Vertaald uit het Nederlands

Talaabooyinka Agoosto 20

Hordhac

Dawladdu waxa ay leedahay xeerar si fayraska Corona loo joojiyo. Xushmee xeerarka. Markaa ayaad cudurka ka badbaadaysaa ama qofka kale aad ka badbaadinaysaa.

Fiirif gaar ah: Magaalooyinka iyo degmooyinka qaarkood waxay leeyihiin xeerar dheeri ah. Hubi bogga interneetka ee magaaladaada ama degmadaada.

Tilmaamahaguud

- Joog guriga haddii aad xanuunsanayso.
- Si joogto ah gacmaha biyo iyo saabuun isaga dhaq
- Ka fogow dadka kale ugu yaraan masaafo dhan 1.5 mitir.
- Qoys kasta (dadka wadanool dhamaantood) waxay la balami karaan ugu badnaan 5 qof
- Ma ilaalin kartaa masaafada kala fogaansho ee 1.5 mitir? Markaa waxaad nashaadaad la samayn kartaa ugu badnaan 10 qof, tusaale ahaan in aad soo yara lugayso ama biskileeti wadato.
- Ma joogtaa goobaha dadweynaha ee dadku ku badanyahay (guriga-degmada, dukaan, suuq, shaneemo, maktabad, tareen, bas...)? Ma ka wayntahay 12 sano? Waa in maaskaro afka aad xirataa. Waa waajib mar ka la joogo meelaha gaarka ah.
- Ma joogtaa meelo kale oo ma ka fogaan kartid masaafo dhan 1.5 mitir ah dadka kale? Waxa fiican mar kaa in aan xirato maaskaro afka ah.
- Mar kasta waa in aad maaskaro afka aad wadato.

In magaalo kale ama dal kale la aado

- Beljamka gudihisa:
 - Si xor ah ayaad ugu dhax safri kartaa.
 - Ma isticmaashaa gaadiidka dadweynaha (bas, taraam ama tareen)? Ma ka wayntahay 12 sano? Waa in aad xirato mar kaas maaskaro afka ama shaal aad ku daboosho afka iyo sanko. Taas waa waajib.
- Fasaxa dalka dibadda ka ah:
 - Waxaad aadi kartaa oo kaliya wadan ka mid ah Midowga Yurub, oo ay ku jiraan Midowga Boqortooyada Ingriiska, Switzerland, Liechtenstein, Iceland, Norway.
 - Wadan kasta xeerar u gaar ah ayuu yeelan karaa. Xeerarka ka fiirso https://diplomatie.belgium.be/nl/Diensten/Op_reis_in_het_buitenland/reisadviezen.

- Waa in aad foom (formulier) buuxisaa kahor intaadan ku soo noqon Beljemka. Waxaad ka helaysaa foomka: <https://travel.info-coronavirus.be/public-health-passenger-locator-form>.
 - Waxa loo qaybiyay aagagga (zones) 3 nooc.
 - ▶ Waad u safri kartaa aagagga cagaaran. Goobahaas waa amaan.
 - ▶ Lama oggola in aad u safarto aagagga gaduudan (cas).
 - ▶ Waxa fiican sidoo kale inaad aadin aagagga liimiga (oranjiga) ah.
- Ka fiiri bogga internetka ee Arimaha Dibadda: <https://diplomatie.belgium.be>.
- Ma soo joogtay aagga gaduudka (cas) ? Waa in aad xaqiiqdii samaysaa 3 dan shay haddii aad ku soo laabato Beljemka:
 - 1 Waa qasab in aad karantiil gasho. Waa in sida ugu dhasaha badan isu baartaa. La xiriir dhakhtarkaaga.
 - 2 Waa in aad guriga joogtaa. Aad banaanka kaliya marka aad ku qasbantahay. Tusaale ahaan si farmashiyaha, dhakhtarka ama subarmarketka aad u aaddo. Mar kaas xiro mar kasta maaskaro afka.
 - 3 Ha ogolaan dad kale guriga in ay ku la joogaan.
 - Ma soo joogtay aag liimi ah (oranje zone)? Samee 3 dan shay haddii aad ku soo laabato Beljemka:
 - 1 Waxa fiican in aad karantiil gasho. Waa in sida ugu dhasaha badan isu baartaa. La xiriir dhakhtarkaaga.
 - 2 Aad banaanka kaliya marka aad ku qasbantahay. Tusaale ahaan si farmashiyaha, dhakhtarka ama subarmarketka aad u aaddo. Mar kaas xiro mar kasta maaskaro afka.
 - 3 Ha ogolaan dad kale guriga in ay ku la joogaan

Shaqa

- Ku shaqee kuriga, haday suurto gal tahay.
- Ma ku qasbantahay in aad shaqa aaddo? Maamulahaagu waa in uu diyaariyaa in ay dadka u dhexeeyso masaafad dhan 1.5 mitir. Sidaas manoqon wayday? Markaa waydiiso maamulahaaga maaskarada afka.
- Su'aalo ma qabtaa? Waxa macluumaad ku siindoona maamulahaaga.

Dukaammada

- Dhammaan dukaamadu way furan yihiin. Suuq ayaa jira.
- La soo adeego ugu badnaan 2 qof.
- Dukaamada gudahooda iyo suuqa marka aad joogto waa in maaskaro afka aad xirataa. Taas Waa waajib.
- Dukaanka habeen kii shaqeeya waxa uu furan yahay ilaa 22 saac habeenkii.
- Waad aadi kartaa timo-jaraha ama goobaha qurxinta gaarka.
 - Ballan samayso.
 - Xiro maaskaro afka

Hoteellada, maqaaxiyaha iyo kafateeriyadaha

- Kafateeriyadaha iyo maqaaxiyaha way furan yihiin ilaa 1 da aroornimo (saqdhaxe).
 - Waxa fiican in aad horay u sii balansato (boos u sii qabsato).
 - Aad kafateeriyadaha iyo maqaaxiyaha kalidaa ama qoyskaaga israaca (ama dadka aad isla degantihiiin) iyo 5-ta qof ee joogtada ah ee xiriirka aad leedihiin.
 - Miiska aad fadhido ku ekoow in aad fadhidow.
 - Waa in maaskaro afka aad xirataa. Taas Waa waajib. Miis ma fadhidaa? Markaa lagaama rabo in maaskaro afka aad xirato.
 - Waxaad ku dhaafaysaa goobta macluumaadkaaga lagaaga soo xiriiro.

Xiriirka bulshada

- Qoys kasta (ama dadka isla nool dhamaantood) waxa ay la balami karaan ugu badnaan 5 qof. Waa in ay ahaadaan markasta isla 5 taas qof.
- Ma ilaalin kartaa masaafada kala fogaansho ee 1.5 mitir? Markaa waxaad nashaadaad la samayn kartaa ugu badnaan 10 qof, tusaale ahaan in aad soo yara lugayso ama biskileeti wadato.

Dhaqdhaqaaqa

- Ma ka tirsan tahay naadi isboorti? Markaas waxaad la jimicsan kartaa ugu badnaan 50 qof.
- Waxaad ku jimicsan kartaa goob jimicsi, naadi isboorti ama barkadaha dabbaasha.
- Waad aadi kartaa saunasada ama xarumaha fayodhowrka.

Waqtiyada firaaqada

- Waxkasta way furan yihiin, tusaale ahaan maktabadda, beeraha madadaalada (pretpark), jardiin lagu ciyaaro oo gudaha ah (binnenspeeltuinen) ama qamaarka (casino).
- Ma aadaysaa munaasabadaha sida rasmiga ah loo soo agaasimay (tusaale ahaan xaflad tuulo, tartan isboorti ama bandhig dhaqameed)? Waxa jirta ugu badnaan tiro go'an oo ka soo qaybgaleyaal ah.
 - ugu badnaan 200 oo qof gudaha, ugu badnaan 400 oo qof dibadda.
- Urur kasta waxa uu leeyahay xeerar u gaar ah. Ka hubi boggooda interneetka.
- Carruurto xero (kamp) way aadi karaan.
- Waa in aad xirato maaskaro afka. waa waajib marka aad joogto goobahan:
 - Dukaammada iyo xarumaha dukaammada,
 - Jidadka dukaammada,
 - Goobaha mashquulka ah,
 - Dhismooyinka dadweynaha,
 - Suuqyada,
 - Gaadiidka dadweynaha,
 - Maktabadaha,
 - Shaneemooyinka,
 - Matxafyada,
 - tiyaatarka, riwaayadaha, hoolalka-shirarka,

- hoolalka-kulannada,
- Carwada kermiska (de kermis),
- Guryaha cibaadada.
- Waxaad siinaysaa macluumaadka lagaala soo xiriiri,haddii aad aaddo:
 - Xarumaha fayyo-qabka (wellnesscentra),
 - Casharo isboorti ah aad naadi u aaddo,
 - Barkadaha dabaasha,
 - Goobaha khamaarka (casino's),
 - Hoollalka xafladaha iyo soo dhawaynta.

Maxaa kale oo aan la ogolayn ?

- Dhiskoteegyada iyo cawaysyada habeenkii (nachtclubs) wali ma furna.
- Dhacdooyinka waaweyn lama ogola.

Diinta

- Adeegyada diiniga waa la ogol yahay.
 - Waxa joogi kara ugu badnaan 100 oo qof.
 - Xiriir jirka ah lama ogola.
 - Waa in aad xirataa maaskaro afka. taas waa waajib.
- Waxaad u samayn kartaa aaska ama duugta munaasabad soodhawayn ah.
 - Waxa ka soo qaybgali kara ugu badnaan 50 qof.

Xanaanooyinka (Crèches) iyo Iskoolka

- Xanaanooyinka (crèches) way furan yihiin.
- Ardayda dhamaantood 1 sabtembar waxay aadi karaan iskoolka. Iskoolkaaga ayaa macluumaad dheeri ah oo la xiriira sanad dugsiyeedka cusub ku siin doona.

Dhiirigelin

Xeerarkan waxa ay muhiim u yihiin caafimaadka qof kasta. Qofkasta waxa laga rabaa in uu xushmeeyo.

In aad sidaa yeesho waad ku mahadsantahay. Si wada jir ah ayaan fayraska Corona-ha u joojinaynaa.